**Gobolka Stockholm**
Xarunta daryeelka caafimaadka caruurta 2021-05-07

# Ma doonaysaa adigu inaad wax badan ka ogaato si aad u fahamto go'aanka ku saabsan talaalada caruurtaada.

Warbixintaan waxa ay khusaysaa waalidiinta iyagu ka shakinaya ama diidaya in ilmahooda la talaalo.

Mar walba waa adiga waalidka ah qofka go'aaminaya in la talaalayo ilmahaada iyo in kale. Adigu waxa aad xaq u leedahay in lagugu wargeliyo dhibaatada iyo wanaaga ee la socoto dhamaan wax kaqabadyada ka hortag ah iyo daawaynada ka dhex jirta xarumaha caafimaadka iyo daryeelka. Talaaladana waa ay khusaysaa xitaa.

Hadii aad doorato inaad diido ama aad dib u dhigatid talaal waxa aad adigu markii la doono ee waqti danbe oo kale ah aad dooran kartaa in aad ogolaato in la talaalo ilmaha. Inta abadan waalidiinta iyagu diida in la talaalo caruurtiisa sida aay sheegayso barnaamijyada talaalka ee qaranka waxa ay doortaan bedelkeeda inay bilaabaan talaalada marka uu ilmuhu soo waynaado.

**Maxay tahay in la ogaado?**
Si aad ugu dareento kalsooni go'aankaada dib u dhigista ama diidida in aad talaasho ilmahaada waxa jira dhow shay oo aad adiga , waalidka ahi aad u baahan tahay inaad ogaato:

- Wanaaga iyo dhibaatooyinka la socda talaada lasoo bandhigay ee heer qaran ama gobol ee barnaamijyada talaalada ee caruurta. Warbixino kale oo dheeraada waxa aad adigu ka helaysaa isku xirka xagga hoose ee bogga.
- Caruur aan talaalayn waxa uu khatar ugu jiraa in cudurka loo soo gudbiyo ama uu u xanuunsado, tusaale ahaan cudurka xiiq dheerta oo aan inagu uga talaalno caruurta barnaamijka talaalada caruurta. Middan nafsadeeda ayaa keeni karta khatarta cuduro aad u daran iyo iin aan harin. Ilaa iyo inta ilmo aan talaalayn uu joogo goob ay inta badani ay talaalan yihiin waxa difaacaya waxa loogu yeero difaaca jirka raxanta ah ( kuma jirto teetanada, hoos kasii aqri wixii dheeri ah) markaas waa ay yar tahay khatarta in cudurka loo soo gudbiyo.
- Waa in aad xasuusnaata inay keliya ku filan tahay in qof keliya oo la qabadsiyyay cudurka uu soo dhex galo kooxda si ay khatarta laysku gudbiyaahi ay u jirto. Khatartaani waxay sii kordhaysaa hadii cudurku uu ku fidaayo hawada sida tusaale ahaan jadeecada. Khatarta isu gudbinta waxa ay kordhaysaa marka ay dad badani kulmaan. Caruurta xogaa roon iyo dhalinyarada waxa tusaale ahaan laga hadlayaa joogitaanka xerooyinka, riwaayadaha iyo kulamada ciyaaraha.

**Gobolka Stockholm**
Xarunta daryeelka caafimaadka caruurta 2021-05-07

- Dhanka safarada caruurta aan talaalayn waa in laga fikiraa xitaa hadii safarka la aadayo yahay bii'ad ay khatarta faafitaanku uu yar yahay in inta safarka lagu guda jiro aad sii maraysid meelo ay khatarta faafitaanku uu badan wayn yahay, sida garoomada diyaaradaha.
- Qaar kamid ah cudurada aan iska talaalayno waa ka caadi wadamada kale. Cunug aan talaalayn waa uu u xanuunsan karaa cudurka noocaas oo kale ah inta safarka lagu jiro ama marka uu la xiriiro qof ka yimid wadankaas oo yimid Swidhen.
- Ilmo aan talaalayn waxa uu khatar u yahay inuu u gudbiyo dadka kale cudurada aan iska talaalayno. Tusaale ahaan ilmo ka yar hal sano oo aad uga yar in la talaalo iyo qaarka difaacooda jireed uu hooseeyo oo si khaasa u nugul.
- Waa muhiim in loo sheegaa shaqaalaha caafimaadka ee la kulmaaya ilmaha in uusan talaalayn. Waxa ay keeni kartaa baahiyo kale oo wax ka qabad/daawayn oo mararka qaar ah degdeg (hoos ka fiir waxyaalaha ku saabsanka hortaga daawaynta ka dhanka ah teetanada).

**Warbixin ku socota caruurta aan talaalayn**
Waa ay fiican tahay adiga ah waalidka inaad qoratid, markaas kadibna aad wargelisid ilmaha in aad adigu maya aad dhahday talaal ilmaha daraadood. Hadii kale waxa jiri karta khaatar ah in ilmuhu u maleeyo inuu talaalan yahay maadaama "dhamaan inta kale " ay talaalan yihiin oo uu tusaale ahaan uu u baxo safaro uusan u warhayn khatarada inuu ku dhaco in loo soo gudbiyo.

**Sidee ayaa looga hor tego karaa teetanada caruurta aan talaalayn?**
Xiriiriyayaasha hoos ku qoran waxa aad ka aqrisan kartaa waxyaalaha ku saabsan teetanada iyo cudurada kale ee ay Swidhen ka bixiso talaalada. Khatarta keliya marka ilmo aan ka talaalayna uu qaado teetanada waxa aad adiga ah waalidka ah maalinka koowaadba u baahan tahay inaad ogaato sida aad samaynasid. Teetanadu waa caabuq nabareed aad u daran oo uu sababo bakteriyo ku jirta dhulka iyo bacrimiyayaasha beeraha ee dunida oo dhan. Caabauqa teetanadu daawayn la'aan waxa uu keenaa dhimasho.

Waxa ka jira talaal waxtar leh oo ka mid ah barnaamijka talaalada guud ee swidhen. Talaal waa habka keliya ee aad difaac uga heli karto ka dhan ah caabuqa teetanada maadaama cudurka oo kugu dhaca iyo difaaca jirka koox uusan midna ku siinaynin difaac. Swidhen gudaheeda waxa sanad walba ka dhaca hal dhacdo oo teetano ah oo shaqsiyaadka aan talaalayn ah, si gaar ahaaneed dadka waawayn. Caabuqa teetanadu waxa uu imaan karaa oo sababaya qaniinyo xayawaan ama nabar yimid markii tusaale ahaan uu jiro cayaar ama shaqo gudaha beeraha nasashada iyo beeraha yaryar. Sidaas daraadeed ayaa lagula talinayaa inaad ilamaahaga ka yar halka sano ka talaashid teetanada kahor inta uusan bilaabin inuu ku cayaaro banaanka. Caabuqa teetanada waxa uu xitaa ka imaan karaa nabarada aad u daran.

Hadii aad leedahay xayawaan guri jooga ah, tusaale ahaan eey ama mukulaa (bisad), waxa jiri karaysa khatar caabuqa teetanada markuu yimaado nabar xagatin ah ama qaniinyo. Wixii dheeraada ee ku aaabsan teetanada waxa aad adigu ka qrisan kartaa bogga internetka ee hay'adda caafimaadka:

Stelkramp-folkhälsomyndigheten Teetano-hay'adda caafimaadka
Hadii ilmahaada aan talaalayn ama aan haysan talaal dhamaystiran uu ku dhaco dhaawac nabar ama qaniinyo xayawaan waa in ilmaha si dhaqsiya, isla maalinkaas lagu qiimeeeyaa xarunta gargaarka degdega.

**Gobolka Stockholm**
Xarunta daryeelka caafimaadka caruurta 2021-05-07

Markaas oo uu dhaqtarku qiimayn doon in hadii immunoglobulin oo si khaas ah loogu tala galay bakteriyada teetanada la siinayo iyo in kale.

Immunoglobulin waa difaace jir oo uu isticmaalo difaaca jirka si uu u helo una ogaado maadooyinka soo galay sida feyruska iyo bakteriyada. Dhaqtarku waxa kale oo uu qiimaynayaa in hadii talaalka teetanada la bilaabayo.

Adiga ah waalidka iyo dhaqtarka/kalkaalisada ilmahaada waxad halkan ka qrisan kartaa wixii dheeraada

Stelkrampsprofylax vid sårskodor-vårdgivarguiden

Ha ka shakin inaad kalkaalisadaada ama dhaqtarkaada xarunta daryeelka caruurta aad waydiiso su'aalahaada iyo iswaydiimahaada!

Warbixin dheeraada

Rikshandboken
Vaccination av barn - 1177.se
Vaccinationer och säkerhet - Folkhälsomyndigheten
Informationsmaterial om vaccinationer
Information till vårdnadshavare om det svenska vaccinationsprogrammet för barn (finns på flera språk)
Oxford vaccine group
BVC-podden: Vaccin - därför är det så viktigt
BVC-podden: Vaccin - vem ska jag lita på

/Qaybta daryeelka caafimaadka caruurta ee gobolka Stockholm, dib loo qoray 2021-05-07